

UW Medicine

Xeerka Kaalmada Dhaqaale – Guudmarka Luuqadda Cad ku Qoran

Kaalmada Dhaqaale ee La Bixiyo: UW Medicine waxay siisaa kaalmo dhaqaale, oo hoos timaada Xeerkeeda Kaalmada Dhaqaale, bukaanada u-qalma ee aan awoodin inay bixiyaan daryeelka gurmada degdeg ah ama wixii kale ee daawayn daruuri ah. Bukaanada doortay UW Medicine waxay ka faa'idi waayo-aragnimadayada, khibraddayada iyo daryeelkayaga caafimaad ee casriga ah, kuwaas oo dhammaan isku hal nidaam oo caafimaad ah. “UW Medicine” waxaa kamid ah Airlift Northwest, Harborview Medical Center, UW Medical Center, UW Physicians, Neighborhood Clinics, iyo Valley Medical Center.

Shuruudaha U-qalanka iyo Kaalmada La Bixiyo: U qalmitaanka gargaarka maaliyadeed wuxuu ku salaysan yahay dhowr arrimood, oo ay ku jiraan nooca xaaladda iyo daryeelka loo baahan yahay, caymiska iyo ilaha kale ee lacag bixinta, dakhliga, tirada qoyska, hantida, degganaanshaha gobolka WA iyo wixii tixgelin gaar ah ee bukaanka ama dakhtarka jeclaan lahaayen in la tixgeliyo. Bukaanada raadinaya kaalmada dhaqaale waa in ay u hoggaansanaadaan nidaamka arjiga Kaalmada Dhaqaale. Taas oo ay kamid tahay inuu soo gudbiyo bayaanka W-2, waraaqaha mushaharka ee wakhtigan, bayaanada bangiga **ama** buuxinta nidaamka arjiga ee dhamaan ilaha kaalmada, oo ay ku jiraan kaabista gobolka ee daryeelka Medicaid.

Sida Loo Dalban Karo Kaalmada iyo Waxa U Qalanka Kaalmada tahay: Bukaanka ama qof kasta oo ku lug leh daryeelka caafimaadka bukaanka, oo ay ku jiraan xubin qoyska ah ama daryeel bixiye, waxay muujin karaan welwelka maaliyadeed mar kasta. Kadibna bukaanka ama cida ka masuulka ah ayaa lagu dhiirigalin inay buuxiyaan arjiga kaalmada dhaqaalaha. Si loogu qalmo kaalmada dhaqaalaha, waxaa la soo gudbin karaa arjiga wakhtigii la doono kahor intaan amar maxkamadeed ka soo bixin xisaabta. Kaalmada dhaqaaluhu waxay ku kooban tahay daryeelka caafimaad ee laga bixiyo UW Medicine. Kharashaadka sida safarka, raashinka, hoyga, iyo qalabka daawaynta ee waara ee aan lagu bixin Kaalmada Dhaqaalaha.

Daawooyinka waxaa lagu dari karaa haddii uu qoray bixiye UW Medicine ah oo uu daawadana bixiyay farmasiga UW Medicine (Haddii I helayo). Dawooyinka Aan La Qorin (Over-the-counter, OTC) laguma bixiyo Kaalmada Dhaqaale.

Halka Laga Helayo Nuqullada, Gudbi Waraaqaha iyo Xogta Xidhiidhka: Xeerka Kaalmada Dhaqaalaha UW Medicine, Arjiga Kaalmada Dhaqaalaha, Guudmarka Luuqadda Cad ku Qoran, iyo Shuruudaha Biilka iyo Ururinta waxa lagu helaa bilaa lacag. Dokumentiyadan waxaa lagu heli karaa onlayn ama waxaa laga daabacan karaa uwmedicine.org/financialassistance ama valleymed.org/financialassistance. Waxa aad dalban kartaa nuqulkaaga adiga oo la hadalaya goobta deegaankaaga ee aad daryeelka ka doonanayso. Nuqullo ayaa ku diyaar ah Waaxda Gelidda iyo Gurmada Degdeg ah ee goobaha isbitaalka UW Medicine.

Arjiga Kaalmada Dhaqaalaha oo Ingiriisi ah iyo waraaqaha taageerada, waxa aad iminka isticmaali kartaa MyChart (marka laga reebo Airlift Northwest) ee gudbinta waraaqaha kuwaas oo ku salaysan goobta daryeelkaaga. Arjiyada kale waxaa lagusii gudbin karaa bosta, faakiska, ama iyada oo la keenayo. UW Medicine waxa ay u qaban doontaa sir iyo si sharaf leh. Wixii macluumaad ah ee loo gudbiyo kaalmada dhaqaale waxaa la ilaalin doonaa macluumaadkiisa sirta ah sida uu dhigayo Daaqada Caymiska Caafimaadka iyo Sharciga La Xisaabtanka (Health Insurance Portability and Accountability Act, HIPAA).

<p>Harborview Medical Center UW Physicians UW Neighborhood Clinics Financial Counseling 325 9th Ave; Mail Stop 359758 Seattle, WA 98104-2499 Taleefan 206.744.3084 FAAKIS 206.744.5187 Isniin-Jimce 8:00 subaxnimo. – 4:30 galabnimo. mychart.uwmedicine.org</p>	<p>UW Medical Center-Montlake UW Physicians UW Neighborhood Clinics Financial Counseling 1959 NE Pacific Street; Mail Stop 356142 Seattle, WA 98195-6142 Taleefan 206.744.3084 FAAKIS 206.598.1122 Isniin-Jimce 8:00 subaxnimo. – 4:30 galabnimo. mychart.uwmedicine.org</p>	<p>UW Medical Center-Northwest UW Physicians UW Neighborhood Clinics Financial Counseling 1550 N 115th St Seattle, WA 98133-9733 Taleefan 206.744.3084 FAAKIS 206.598.1122 Isniin-Jimce 8:00 subaxnimo. – 4:30 galabnimo. mychart.uwmedicine.org</p>
<p>Valley Medical Center Patient Financial Services P.O. Box 59148 Renton, WA 98058-2148 Taleefan 425.690.3578 FAAKIS 425.690.9578 Isniin-Jimce 8:00 subaxnimo. – 5:00 galabnimo mychart.valleymed.org/#mychart</p>	<p>Valley Medical Center Patient Financial Services 3600 Lind Ave SW, Suite 110 Renton, WA 98057-4970 Taleefan 425.690.3578 FAAKIS 425.690.9578 Isniin-Jimce 8:00 subaxnimo. – 5:00 galabnimo mychart.valleymed.org/#mychart</p>	<p>Airlift Northwest Patient Financial Services 6505 Perimeter Road S., Ste 200 Seattle, WA 98108 Taleefan 206.598.2912 FAAKIS 206.521.1612 Isniin-Jimce 8:00 subaxnimo. – 5:00 galabnimo</p>